



## Addeegii cuntadu wuxuu sii socoon doonaa inta lagu jiro fasaxa xaggaaga

Waaxda Addeegyada Cuntaada PPS waxa ay kordhinaysaa addeegyadii cuntada ee waqtigan **laga bilaabo Juun 11keeda ilaa Ogosto 21keeda**, cuntadaasi oo laga bixi doono 13 goobeed oo ka mid ah 15 kii goobeed ee cuntada laga bixinayey ilaa bishii Maarso, iyada oo lagu kordhiyey goobo cusub.

Xilliga fasaxa xaggaaga iskuulada Rigler iyo Harrison Park kama mid noqonayaan goobaha cuntada lagu bixinayo sababtoo ah waxaa ka socda mashruucyo dib u dhis lagu sameynayo dhismayaashooda, laakiin waxaan ku kordhay iskuulka Faubion oo noqonaya goobta 14 naad ee goobaha cuntada laga bixinayo. **Quraacda iyo qadadda** waxaa la siin doonaa arday kasta oo PPS iyo caruurta da'doodu u dhaxayso 1 sano ilaa 18 sanno, maalmaha **Isniinta ilaa Khamiista**. Cuntadii maalmaha Jimcaha, Sabtida iyo Axada waxaa la bixin doona maalinta Khamiista. Caruurta looma baahna inay iyagu cuntada ka soo qaataan goobaha lagu bixinayo cuntada

Cuntada waxaa laga soo qaadan karaa bannaanka iskuulka saacadu marka ay tahay **11:30 subaxnimo**. - **1 duhurnimo** (fadlan waxaad ogaataa waqtiga dambe ay bilaabmayaa) goobaha xagga hoose ku qoran:

- *Dugsiga Hoose ee Boise-Eliot/Humboldt - 620 N Fremont Ave.*
- *Dugsiga Hoose César Chávez - 5103 N Willis Blvd.*
- *Dugsiga Hoose Dr. Martin Luther King Jr. - 4906 NE 6th Ave.*
- *GOOB CUSUB! Iskuulka Faubion - 2930 NE Dekum St.*
- *Dugsiga Sarre ee Franklin - 5405 SE Woodward St.*
- *Dugsiga Dhexe ee George - 10000 N Burr Ave.*
- *Dugsiga Hoose ee Grout - 3119 SE Holgate Blvd.*
- *Iskuulka Lent - 5105 SE 97th Ave.*
- *Dugsiga Sarre Madison ee Marshall - 3905 SE 91st Ave.*
- *Dugsiga Hoose ee Markham - 10531 SW Capitol Hwy.*
- *Dugsiga Hoose ee Rosa Parks - 8960 N Woolsey Ave.*
- *Dugsiga Hoose ee Scott - 6700 NE Prescott St.*
- *Dugsiga Hoose ee Sitton - 9930 N Smith St.*
- *Dugsiga Hoose ee Woodmere - 7900 SE Duke St.*

Fadlan waxaad ogaataa in 15 goobeed ee hore lagana bixinayey cuntada ilaa intii iskuulada la xiray bishii Maarso 16keedii inay sii socon doonaa ilaa maalinta Khamiista, Juun 11-keeda, iyada oo iskuulka Faubion lagu soo kordhiyey goobaha cuntada laga bixiniyo halka iskuulada Rigler iyo Harrison Park la xirayo maalinta Isniinta ee bisha Juun 15.

Sanadihii aan soo dhaafnay, Addeegga Cuntada sidoo kale wuxuu iskaashi la leeyahay waaxda

Jardiinooyinka iyo Goobaha lagu nasto (Portland Parks & Recreation) sidii cuntada loogu bixin lahaa goobaha jardiinooyinka ee magaalada laga bilaabo bisha Juun 22 keeda. Goobaha lagu nasto cinwaanadoodu waa kuwan halkan hoose ku qoran:

<b>Magaca Jardiinada</b>	<b>CINWAANKA</b>	<b>Waqtiga Addeega Cuntada laga bixinaho</b>
Kenton Park	N Delaware Ave. and N Kilpatrick St.	duhur-2 p.m.
Peninsula Park	700 N Rosa Parks Way	duhur-2 p.m.
St Johns Park	8427 N Central St.	12:30-1:30 p.m.
Columbia Park	N Woolsey Ave. and N Winchell St.	12:30-1:30 p.m.
Alberta Park	NE 19th Ave. and NE Jarrett St.	duhur-2 p.m.
Cully Park	5810 NE 72nd St.	duhur-2 p.m.
Irving Park	875 NE Fremont St.	12:30-1:30 p.m.
Khunamokwst Park	5200 NE Alberta St.	12:30-1:30 p.m.
Montavilla Park	NE 82nd Ave. and Glisan St.	duhur-2 p.m.
Essex Park	SE 76th Ave. and Center St.	duhur-1 p.m.
Harrison Park	SE 84th Ave. and Harrison St.	12:30-2:30 p.m.
Lents Park	SE 92nd Ave. and SE Steele St.	duhur-2 p.m.
Mt Scott Park	SE 72nd Ave. and SE Ramona St.	duhur-2 p.m.